

## Enrolment policy - Somali

# Qorshaha Diiwaangelinta

## Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta

Qorshaha ka Diiwaangelinta ardeyda Dugsiyada Dowlada ee NSW waa wax jira si looga caawiyo dugsiyada inay fuliyaan waajibaadkooda hoos imanaya *Xeerka Waxbarashada 1990* – si loo hubiyo in ardey kastaa uu boos ku leeyahay dugsiga degaankooda. Qorshuhu sidoo kale wuxuu kala hadlayaa shaqaalaha iyo bulshada nidaam diiwaangelineed cad.

### Waa maxay sababta qorshaha diiwaangelinta dib loogu habeeyey?

Gobolka oo dhan, jaaliyado badani waa isbedelayaan. Qaar waxay u korayaan si ah heer aan weli hore loo arag. Dugsiyada qaarkood oo aqbali jiray diiwaangelinta ka baxsan goobtooda degaan, uma hayaan wax boos ah si ay sidaa u sii sameeyaan.

Qorshaha dib u habeynta waxaa loogu tala galay inuu ka taageero dugsiyada inay maareeyaan dhammaan codsiyada diiwaangelinta, kuna dhiirigeliyaan hab weyn aan isbebedelin oo ay go'aanka ku gaaraan kuna hubiyaan in doorashooyinka diiwaangelintu ay u cad yihiin waalidiinta.

### Waa maxay isbedeladu?

#### The enrolment cap

The enrolment cap waa inta ardey ee laga diiwaangelin karo dugsiga oo ku saleysan intuu dugsigu qaadi karo ee joogtada ah. The enrolment cap wuxuu noo sheegayaa in dugsiga laga yaabo inuu leeyahay muga uu ku aqbali karo amase uusan ku aqbali karin diiwaangelinada aan degaankiisa ahayn. Ma aha waxa la beegsanayo ama xadka tirada inta laga diiwaangelinayo degaanka ee dugsigu qaadan karo.

Dugsi kastaa oo leh goobta uu ardeyda ka qaadanayo wuxuu leeyahay cap ay dejisay wasaaraddu laga bilaabo Term 4 2019.

The enrolment cap ka dhexdiisa, tiro boosaska diiwaangelinta ah waa in loo dhigaa tirada dhici karta ee ardeyda degaanka ee u baahan doona inay iska diiwaangeliyaan inta sannadka lagu jiro. Boosaska diiwaangelinta ee loo dhigay waxaa la yiraahdaa the buffer. Sababtan darteed, dugsigu ma qaadan doono ardey aan degaankiisa ahayn isla markay gaaraan the buffer, inay jiraan xaalado laga soo reebayo mooyaane.

#### 100-qodob ee jeegareynta cinwaanka degaanka

Waalidiinta qorsheynaya inay ka diiwaangeliyaan ilmahooda dugsi u dhow waa buffer ama cap ama inuu gaaray buffer kiisii ama cap waxaa la weydiin doonaa inay buuxiyaan 100- ka qodob ee jeegareynta cinwaanka degaanka si loo xaqiijiyo inay ku nool yihiin goobta degaanka dugsiga loogu talagalay inuu ardeyda ka qaato. Tan micnaheedu waxaa weeye waalidiintu waxay u baahan doonaan inay keenaan dukumiintiyo si loo hubiyo cinwaanka hadda ee ilmaha.

Sidaa daaraadeed dugsiyadu waxay raadiyaan oo kaliya macluumaadka khuseeya ilmaha diiwaangelintiisa, liiska dukumiintiga la ogol yahay ee jeegareynta cinwaanka degaanka waxaa laga helayaa dugsiga ama weybsite ka wasaaradda ee ah https://education.nsw.gov.au/policy-library/policies/enrolment-of-students-in-nsw-government-schools.

#### Shuruudaha xulashada ee diiwaangelinta aan degaanka dugsiga ahayn

Diiwaangelinta walaalaha ayaa hadda si cad mudnaanta loo siinayaa (meeshii suurta gal ah) iyo shuruudaha xulashada ee diiwaangelinta ee aan degaanka dugsiga ahayn kumana jiro doonto awooda ardeyga, waxqabadkiisa ama heerkuu gaarsiisan yahay.

## Maxaan isbedelin?

Dugsiyadu waxay sii wadayaan inay ardeyda goobta degaankooda ka qaataan ardeyda ku nool, iyadoon loo eegaynin xaalada cap dugsiga loo ogol yahay.

Ma jiraan wax isbedelo ah oo lagu sameeyey xaqa ay u leeyihiin diiwaangelinta walaalaha ardeyda aan dugsiga degaankiisa degeneyn. Dugsiyada leh boosas bannaan, codsi kasta oo diiwaangelineed waxaa loo tixgelinayaa caddeyntiisa, oo ay ku jiraan haddii walaalo hadda ay dugsiga dhigtaan. Haddii dugsigu ka hooseeyo intuu qaado codsiyada walaalaha goobta degaanka dugsiga ka baxsan waxaa la siin doonaa mudnaan.

Dugsiyadu waxay sii wadi doonaan inay siiyaan qoysaska taageero iyo talo inta lagu jiro nidaamka diiwaangelinta, oo ay ku jiraan qiimeynta xaaladaha laga soo reebayo ama khasbaya gaar ahaan ardeyda nugul iyo waalidkoodba.

Dugsiyadu waxay sidoo kale sii wadi doonaan inay u fuliyaan qorshaha si caddaalad ah oo aan isbebedelin iyagoo isticmaalaya nidaam muuqda oo isla xisaabtan leh markay go'aamada gaarayaan ku saabsan codsiyada diiwaangelinta. Waalidiintu xaq bay u leeyihiin inay racfaan ka qaataan si loo go'aamiyo in hababkaan la sheegay loo isticmaalay nidaam ahaan si caddaalad ah.

## Laakiinse maxay micno ah oo ii leeyihiin isbedeladan aniga?

### Ka waran haddii ilmaheygu uu haddaba diiwaangashan yahay laakiinse aanan ku nooleyn dugsigaasi goobta uu ardeyda ka qaato?

Ilmahaagu dugsigaas wuu ka sii diiwaangashanaanayaa maadaama qorshahan la naqtiimay uusan saameynaynin ardeyda haddaba ka diiwaangashan dugsiyada Dawalada ee NSW.

### Waxaanu ku jirnay goobta markii ilmaheyga dugsiga laga diiwaangeliyey. Wasaaradda ayaa intaa ka dib bedeshay xadka dugsiga degaankayaguna hadda waa ka baxsan yahay goobta dugsiga. Waxaan leeyahay carruur kale waxaana rabaa in dhammaan ay tagaan isku dugsi. Waa maxay fursadahaygu?

Wakhtiyada qaarkood waa lagama maarmaan wasaaraddu inay sameyso dib isugu hagaajin goobta uu dugsigu ka qaato diiwaangleinta ardeyda. Tan micnaheedu wuxuu noqon karaa qoys ilmo ama carruuri ay haddaba uga diiwaangashan yihiin ayaa ka dib bannaanka ka noqda goobta ardeyda laga qaadanayo. Marka tani ay dhacdo, qoysku weli waxay awoodi doonaan inay ka diiwaangeliyaan walaalaaha iyagoo wada jira dugsiga, iyadoon loo eegeyn in dugsigu ka koreeyo buffer ka ama cap ka.

### Waxaan haddaba leeyahay ilmo ka diiwaangashan goob ka baxsan ardeyda dugsiga Dawlada ee NSW. Ma ka diiwaangelin karaa carruurteyda kale dugsigaas sidoo kale?

Tani waxay ku xirnaan doontaa inta dugsigu uu qaado:

- Haddii dugsigu **uusan ku dhaweyn buffer** kiisa, ka dib walaalaha waa in dugsiga laga diiwaangeliyaa. Xaqiiqdii, walaalaha ardeyda hadda diiwaangashan ayaa mudnaanta la siin doonaa, meeshii suurta gal ah, oo ka horeynaya codsiyada diiwaangelinta ee aan degaanka dugsiga ahayn.
- Haddii dugsigu uu **ku dhow yahay buffer kiisa**, ka dib dugsigu wuxuu sameyn doonaa koox guddiga ah diiwaangelinta ardeyda aan degaanka ahayn. Guddigani wuxuu tixgelinayaa codsiyada diiwaangelinta ee aan degaanka ahayn marka tirada codsiyada aan degaanka ahayn ee la qabtay ay ka badato inta boos ee la heli karo ee buffer ka hooseeya. Mar labaad, markan oo kale, walaalaha ardeyda haddaba ka diiwaangashan ayaa mudnaanta laga siin doonaa, meeshii suurtagal ah, codsiyada diiwaangelinta aan deegaanka ahayn ee kale.
- Haddii dugsigu uu gaaray **intii uu qaadan karay tusaale, uu buuxo**, ma aqbali doonaan codsiyada diiwaangelinta ee aan degaanka dugsiga ahayn ilaa ay ka jiraan xaalado laga soo reebayo mooyee.

### Haddaba waxaan u aqbalay boos ilmahayga inuu dugsiga dhigto 2020 kaasina ma aha dugsiga degaankayga. Maxaa dhacaya hadda?

Diiwaangelintu way sii soconaysaa. Diiwaangelinta aan ahayn degaanka dugsiga ee la aqbalay ka hor Term 4 2019 ee ardeyda bilaabaysa 2020 ma aha inay saameyso.

### Waa maxay shuruuda diiwaangelinta dugsiga aan degaankayga ahayn?

Dugsiyada awooda inay aqbalaan codsiyada diiwaangelinta ee aan degaankooda ahayn waxay sameynayaan guddiga xulida diiwaangelinta aan degaanka dugsiga ahayn, haddii ay baahidu ka badato inta boos ee ka hooseysa buffer ka dugsiga.

Dugsiyada waxaa laga doonayaa inay sameeyaan shuruuda xulida ee ay helayaan jaaliyada dugsigu.

### Xaaladaheygu waa kuwo loolan leh waxaana u maleynayaa in dugsigani yahay ka ugu fiican ilmaheyga. Waxaan deganahay goob ka baxsan inta dugsigu ardey ka qaato. Maxaan sameeyaa?

Waxaan fahamsanahay in xaaladaha qof kastaa aysan isku mid ahayn, waxaana jira xaallado mar mar loo baahanayo oo khasbi doona in la tixgeliyo.

Haddii xaaladu sidaan tahay, waa inaad la hadashaa maamulaha dugsigaaga xaafada.

## La xiriir

Wixii ah weydiimo guud kala xiriir: 1300 679 332 ama iimeyl: DoEinfo@det.nsw.edu.au

Weydiimaha diiwaangelinta ku saabsan, la hadal dugsigaaga xaafada. Ka raadi faahfaahinta xiriirka dugsiga: https://education.nsw.gov.au/public-schools/going-to-a-public-school/finding-a-public-school

## AdeegaTurjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad dugsiga la xiriirto, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 13 14 50 kuna weydii turjumaan luuqadaada. U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka aad dooneysid inaad wacdo xiriiriyuhuna wuxuu khadka soo gelin doonaa turjumaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.